# Khudbadii maalinta haweenka dhaqammada kala duwan

Khudbaddii Boqoradda Haybadda leh ay ka jeedisay dabbaaldeggii dhaqammada kala duwan ee 8da March oo lagu qabtay Folketeateret, Oslo, 8 March 2013.

Haweenka sharafta lahow,
ka qaybgalayaasha sharafta lahow
Sannadguuro farxad leh!

100 sano ka badan ayay taallada quruxda badan ee Camilla Collett ka bidhaamaysay barxadda qasriga. Muddo laga joogo 200 oo sano oo gaw ah ayay dhalatay gabadhaas qoraaga ahayd oo u dhaqdhaqaaqi jirtay xuquuqda haweenka. Meeshaas ayay taagan tahay iyadoo maar ah – oo u muuqata inay go'eeda isku duuduubeyso. Sannad kasta 8da March ayaa xirmo ubax ah cageheeda la dhigaa – ubaxaasoo ah farriin ixtiraam iyo qaddarin xambaarsan oo ka timid haweenka Norway.

160 sano ka hor ayay Camilla Collett buug ay u bixisay "Gabdhihii Gudoomiyaha Degmada" ka qortay haween siyaabo kala duwan ugu halgamaya sidii ay bulshada booskooda uga heli lahaayeen. Waxay ka sheekaysay haween u halgamayay in la oggolaado oo la dhegeysto. Haweenka ku jira buugga "Gabdhihii Gudoomiyaha Degmada" waxay ka tageen guryohoodii ay ku dhasheen waxayna aadeen meelo cusub oo aan laga aqoonin.

Waxaan rumaysnahay in qaar badan oo inaka mid ah ay arrintaani si toos ah maanta u taabanayso…

Waxaan jeclaan lahaa inaan arrintaan ku xiriiriyo mid aan anigu goob-joog ka ahaa oo taariikhdeena dhaw dhacday, gaar ahan sannadkii 1975. Waxay ahayd Sannadkii Haweenka ee Qarammada Midoobay aniguna markaas waxaan ahaa amiirad yar oo 38 jir ah. Horay ayaan sannado badan ugu soo noolaa duni ay raggu hor boodayaan, waxayna ahayd inaan halgankayga marxalado dhawr ah u kala qaybiyo. Sidaa awgeed ayaan dareemay inay dabiici iyo lamahuraanba tahay inaan si firfircoon uga qaybgalo dabbaaldegyada Sannadkii Haweenka ee Qarammada Midoobay. Wax yar ayaa iiga baxsanaa nolosha ay raggu dhinac kasta ka hoggaaminayaan. Markaas ayaanse ogaaday in haddii aan rabo in la i maqlo ay tahay inaan codkayga adeegsado. Waxaanse kale oo bartay inaan cod yeelanayo – ka dib marka aan naftayda la halgamo.

Waxaanan waligey illoobi doonin inaan Sannadkii Caalamiga ahaa ee Haweenka aan aaday Halden si aan u soo furo carwo safar. Carwada waxaa loo bixiyay "9 haween ah." Maxaad u maleynaysaan – markii aan Halden imid anigoo tareen la socda waxaa tareenka albaabkiisa igu soo dhoweeyay – saddex nin. Waa sida xaalku yahay!

Muddo ka dib isla sannadkaas, waxaa i farxad gelisay inaan gudoomiyo xulista sawir gacmeedyo loogu talogalay carwada "Haweenka iyo Fanka" oo lagu qabtay Kunstnernes Hus, runtiina aad bay sharaf iigu ahayd inaan warbixintayda u soo gudbiyo guddiga – oo rag iyo dumarba ka koobnaa.

Muddadaas laga soo bilaabo, dhinacyo badan – oo dhinacaan aan ka hadlayno uu ka mid yahay – ayay bulshada Norway is beddello cajiib ah ka samaysay.

Horumar aan si gaar ah u jeclaystay ayaa ah in haweenka Norway ay maanta adduunka oo dhan ka muuqdaan. Arrintaani waxay kobcinaysaa bulshadeenna iyadoo la marayo waddada dhaqammada kala duwan ee sida joogtada ah isu beddelaysa. Xididdadu kalsooni bay na siiyaan. Hase yeeshee xididdadu waxay u baahan yihiin in la xoreeyo oo la nafaqeeyo si ay nolol iyo saldhig adag u sameeyaan.

Meel kasta oo aan tago waa meeshii kale – haddaan booqdo xaafadaha Oslo ama tuulo Woqooyiga Norway ku taal – waxaase aniga i soo jiita in haween dunida dacalladeeda ka kala yimid ay si firfircoon uga dhex muuqdaan bulshooyinka degaannadooda; haweenkaasoo kaalin lagu daydo iyo halyeeyo maalin kasta ah bulshadooda u noqday. Waa haweenka suurogeliyay in adduunku kala socdo. Waxaa intaas sii dheer iyagoo jagooyin muhiim ah bulshada ka haya – sida Wasiirkeenna Dhaqanka.

Iyadoo ay sidaas tahay ayay haddana weli jiraan meelo badan oo daboolis u baahan, gaar ahaan magaalooyinka waawayn. Waxaan haweenka oo dhan, da' kasta ha jireene, uga baahannahay ka qaybgal bulsho oo kan hadda jira ka xoog badan – hadday noqon lahayd nolosha bulshada iyo tan shaqada iyo goobaha go'aannada lagu gaaro intaba.

Siyaabo kala duwan ayaa qofku codkiisa u adeegsan karaa: adigoo ka hadla kulanka waalidiinta, adigoo geesinnimadaadu ku gaarsiiso inaad sheegto fikrad aan horay loo aqoon, adigoo difaaca qof dhibaatada u nugul – iyo adigoo doorashooyinka codkaaga ka dhiibta. Waxyaabaha dhaca marka aan codkeenna adeegsanno:

Muuqayaga ayuu kor u qaadaa
Wuxuu na siiyaa dhiirranaan dheeraad ah iyo inaan nafteenna ku kalsoonaano.
Saharfteenna ayuu dib u soo nooleeyaa. Marmarka qaarkood waa inaan is riixnaa si aan ugu dhiirrano inaan codadkeenna adeegsanno. Hase yeeshee mar kasta oo aan codkeenna adeegsannaba, waxaan sii noqonaa qof dhammaystiran.

Marka aan hadhaw qasriga ku noqdo, waxaan farriin mahadcelin ah hawada u soo marin doonaa taallada Camilla Collett – waayo waxay waddada u sii xaartay haweenkii ka dambeeyay. Gabayaa Åse-Marie Nesse ayaa gabay qurux badan u tirisay haweenaydaas horseeddada ahayd. Haddaba waxaan rabaa inaan sadarro dhawr ah oo gabaygaas ka mid ah khudbadayda ku soo afjaro.

"Adigoo ku duuduuban go'aaga, Camilla Collett
Adigoo – dastuurka walaashiis ah – ayaad aragtay in:

Xornimada ay iska lahaayeen aabbayaasha, wiilasha iyo walaalaha kaliya
Adigaana u ooyay gabdhaha mustaqbalka
xaqa ay waddadooda ku doortaan
xaqa ay ku bartaan duullimaadka...."

Sannadguuro farxad leh